


# Xanibida iyo keli-yeelida, Caawimaada iyo Taageerooyinka habdhaqanka Wanaagsan (PBIS) ee Dugsiyada Ohio.

## Waxa ay Waalidiintu u Baahan yihiin inay Ogaadaan

#EachChildOurFuture

## Sharcigaan Ma Qabanayaa Dhammaan Ardayda?

Sharcigaan ayaa qabanaaya dhammaan ardayda dygsiyada K-12, labadaba ardayda waxbarashada guud iyo ardayda naafada ah, wuxuuna qasab ka dhigayaa adeegsiga habraacyada la ogolaaday si loo yareeyo loona baabi'iyo nidaamayada xanibaada iyo keli-yeelida.

Laga bilaabo Sibteembar 2021, sharciga Ohio ayaa ka doonaaya degmooyinka dugsiga inay ogaysiis sanadle ah ka siiyaan waalidiinta habraacyadooda la xariira shuruudaha caawimaada iyo taageerooyinka habdhaqanka wanaagsan (PBIS) iyo isticmaalka degdega ah ee xanibida iyo keli-yeelida, uuna ku jiro hanaanka cabashada. Qayb kamid ah sharcigaan ayaa dhigaya waalidiinta dugsiyada dawlada ee Ohio in la siiyo xogta soo socota ugu yaraan halmar sanadkiiba.

## Waa maxay ujeedada sharcigaan?

Ujeedada sharcigaan waxaa loogu talagalay in degmooyinka dugsiga ee Ohio inay taageerooyin iyo tababar baxshaan si loo yareeyo meeshana looga saaro baahida loo qabo in ilmaha jir ahaan la xanibo iyo in meel keligii lagu xiro. Sharciga ayaa amraaya in degmooyinka dugsiga ee Ohio:

- Ay ka dhaqan gashaan PBIS (Positive Behavior Intervention and Supports) dhammaan dugsiyada (K-12) ee dhamaan degmada.
- Inay siiyaan macalimiinta hormarin xirfadeed oo la xariirta PBIS.
- Inay baxshaan tababar gaar ah oo ku aadan qaababka looga hortago adeegsiga xanibaada iyo keli-yeelida iyo nidaamyada xanibaada iyo keli-yeelida badqabka leh marka loogu baahdo xaaladaha degdega ah.

Dokumentigan waxaa abuurtay Waaxda Waxbarashada Ohio Xafiiskeeda Carruurta Baahiyaha Qaarka ah Qaba (The Ohio Department of Education Office for Exceptional Children) oo kaashanaysa Isbahaysiga Ohio ee Waxbarashada Carruurta Naafada ah (Ohio Coalition for the Education of Children with Disabilities)

## Wanaagsan

Barista ardayda habdhaqannada dugsigu doonaayo inuu ku arko (filashooyinka guud ee dugsiga) iyo xirfadaha loogu baahan yahay muujinta filashooyinka habdhaqanka

## Habdhaqan

Xaqiijinta iyo xoojinta habdhaqannada la doonaayo

## Caawimaad

Abuurista goob badqab iyo taageero leh oo hagaysa dookhyada habdhaqanka wanaagsan

## Taageerooyinka

Abuurista heerar nidaamsan (qaybaha) oo caawimaad iyo taageerooyin si loo baxsho caawimaada habdhaqan ee cunug kasta u baahan yahay si uu guul u gaaro

P B I S

## Waa maxay PBIS sidee ayayna u qusaynaysaa cunugayga?

Caawimaada iyo Taageerooyinka habdhaqanka Wanaagsan (PBIS) waa hanaan dugsiyadu u adeegsadaan inay abuuraan qaab joogto ah oo lagu sameeyo waxbarid iyo taageerida habdhaqanka wanaagsan. PBIS ayaa loo sameeyay dhammaan ardayda waxayna qabanaysaa dhammaan aagaga dugsiga ee ay ku jiraan fasalka, dariiqyada dhismaha, qolka qadada, musqusha iyo aagaga nasiinada. PBIS waxay gacan ka gaysataa kahortaga ama yaraynta habdhaqannada qalafsan ee khatarta ah oo keeni kara adeegsiga degdega ah ee xanibida iyo keli-yeelida. Naqshada PBIS waxaa ku jira dhaqamada kore.



## Ma ka shakisan tahay in cunugaagu qabo naafo? ?


# Nidaamyada Qaybaha Badan ee T aageerada (MTSS)

Farsamo muhiim ah oo PBIS waa bixinta qaybaha taageerada si loo waafajiyo baahida heerka cunug kasta. Tan waxaa badanaa loogu yeeraa nidaamayada qaybaha badan ee taageerada (MTSS), ama qaybaha taageerada. PBIS ayaa u qaybisa qaybaha taageerada sadex heer:

Xog dheeraad ah oo ku saabsan PBIS ayaa laga heli karaa PBIS-ka Waaxda web-beejkeeda, Isbahaysiga Waxbarashada Carruurta Naafada ah webseedkooda, Xarunta Wada shaqaynta Qoyska ee Gobalka Ohio oo dhanweb-beejkeeda, OCALI iyo pbis.org

## Taageerooyinka Gaarka ah

Dhawr arday ayaa la siinayaa taageerooyin gaar ah oo lagu salaynaayo baahiyahooga gaarka ah, marka lagu daro taageerooyinka Qaybta 1 iyo Qaybta 2. Taageerooyinka Qaybta 3 waxaa kamid ah qaabka kooxda, ayna ku jiraan waalidiinta, si loo naqshadeeyo caawimaado gaar u ah ardayga. Taageerooyinka Qaybta 3 waxaa si joogto ah loogu daraa qiimaynta habdhaqanka shaqeed iyo qorshaha caawimaada habdhaqanka ee ardayga.




## Taageerooyinka La Hiigsanaayo

Ardayda qaar ayaa la siinayaa casharo dheeraad ah iyo fursado ku aadan xirfadaha habdhaqanka oo dheeraad ku ah Qaybta 1 ee taageerooyinka. Dugsiyada ayaa badanaa baxsha taageerooyinka Qaybta 2 oo la siiyo kooxaha ardayda qaba baahiyaha isku midka ah.

## Taageerada Guud

Dhammaan ardayda waxaa la baraa filashooyinka habdhaqanka iyo xirfadaha la xariira filashooyinka habdhaqanka.

## Xanibaada Jireed

Xanibaadu waa adeegsiga jir qabasho toos ah si looga hortago ama loo xanibo dhaqdhaqaaqyada ardayga.

- Shaqaaluhu waa inay xaqiijiyaan in neefsiga ardayga aan la xanibin.
- Shaqaaluhu waa inaysan ardayga wejiga dhulka ugu xajin (qaab dhabac ah).

## Meel ku keli-yeelid

Keli-yeelidu waa ku xirida (ama ku haynta) arday qol ama meel si loo hubiyo badqabka ilmaha iyo dadka kale ayadoo uu korjoogtaynaayo qof wayn.

- Waa inuu jiro kormeer joogto ah oo ay sameeyaan shaqaalaha dugsigu.
- Qolka ama aaga waa inaan la qufulin.
- Goobtu waa inay leedahay fakaag ku filan, nal, hawo, oo ay dhawraysaa badqabka iyo sharaf ardayga.






## Xanibaada jirka iyo keli-yeelida ayaa keliya la adeegsan karaa markay xaalado degdeg ah jiraan

marka caawimaadaha kale fashilmaan ayna jirto khatar wayn oo badqab ama faya qabka ardayga ama dadka kale samayn ku leh. Looma adeegsan karo qanaacada shaqaalaha, qaab edbin ah ama ciqaabid ah ama inay badal u noqoto wax xadid yar ama xanibaad yar. Adeegsiga xanibaada jirka iyo keli-yeelida ayaan marka loo adeegsan karin ardayda dugsiga barbaarinta.







## Farsamooyinka Mamnuuca ah

- Xakamaynta farsamo ama kiimikaad
- Dhabar u qabashada (Prone)
- Ciqaab Adag
- U diididda ilmaha baahiyaha aasaasiga iyo wax kasta oo loo arko xadgudub ka dhan ah ilmaha
- Wax kasta oo neefta ku xiraaya ilmaha
- Adeegsi kasta oo kas ah oo la adeegsado maadooyinka, ficilada, ama agabka keeni kara xanuun jireed ama xanuun daran

## Xog ku saabsan xanibaada jireed iyo keli-yeelida:



### Haddii cunugayga jir ahaan la xiro ama meel lagu keli-yeelo, sidee ayaa la iigu sheegayaa?

Haddii cunugaaga jir ahaan la xanibo ama la keli-yeelo, waxaad filan kartaa talaabooyinka soo socda oo kaaga imaanaaya dugsiga:

- Dugsiga ayaa kusoo wacaaya ama oonleen kuugusoo sheegaaya isla markaba marka falku dhaco.
- Dugsiga ayaa kuusoo diraaya warbixin qoraal ah 24 saac gudahood marka dhacdadu dhacdo. Ogaysiiska waa in lagu qoraa luuqadaada hooyo.

### Maxaa dhacaaya haddii habdhaqanka cunugayga aysan soo hagaagin ama walaacyo ka qabo adeegsiga xanibaada jirka ama keli-yeelida cunugayga?

Haddii aad walaacyo ka qabto habdhaqanka ilmaha ama caawimaadaha la adeegsaday si loo xaliyo habdhaqannada, waa inaad la xariirtaa maamulka dugsiga, macalinka ama la taliyaha dugsiga kadibna ka codsato inuu kulan kuu mudeeyo. Waalidiinta cunuga naafada ah ayaa codsan karaa kulanka Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP).

Haddii aad ka shakido in cunugaagu qabo naafo, waa inaad ka codsato dugsigaaga inay qiimeeyaan baahiyaha cunugaaga ee adeegyada waxbarashada gaarka ah. [Codsashada tusmada qorista warqadda qiimaynta hore.]

Haddii cunugaagu galo sadex dhacdo ama ka badan oo jir ahaan la xanibay ama la keli-yeelay, degmada dugsigaaga waxaa laga doonayaa inay kula kulanto si looga hadlo in qiimaynta habdhaqanka shaqeed (FBA) ama qorshaha caawimaada habdhaqanka (BIP) loo baahan yahay, ama haddii FBA ama BIP ka jira u baahan yahay in wax laga badalo. Dugsiga ayaa awoodi doona inuu kula wadaago nooca caawimaada ay iskudayeen iyo sida cunugaagu uga falceliyay caawimaadahaan. Si wadajir ah, waxaad ka doodi kartaan qorshe caawimaad si aad gacan uga gaysataan yaraynta adeegsiga xanibaada iyo keli-yeelida degdega ah.

### Maxay tahay inaan kala hadlo dugsiga inta lagu jiro kulanka ku saabsan habdhaqanka cunugayga?

Su'aalaha qaar ee aad waydiin karto dugsiga waxaa ku jira:

- Goorma ayuu habdhaqanku dhacaa?
- Maxaa dhacaya kahor intaan habdhaqanka cunugaygu kasii darin?
- Waa maxay caawimaadaha iyo taageerooyinka wanaagsan ee habdhaqan ee lagu tijaabshay cunugayga?
- Sidee ayuu cunugaygu uga jawaabay mid kasta oo kamid ah caawimaadahaan iyo taageerooyinka?
- Ma jiraa shaqaale uu cunugaygu xariir fiican la leeyahay? Xariirkaan ma lagusoo dari karaa caawimaadaha?
- Maxaan samayn karnaa markaan guriga joogno si aan uga caawino cunugayga inuu guul ka gaaro dugsiga?
- Waa maxay nooca tababarka ee shaqaaluhu helaan si ay u maareeyaan dhibaatada una dajiyaan xaalada?
- Shaqaalaha qaybta ka ah dhacdooyinka cunugayga ma qabeen tababarka maaraynta dhibaatada iyo dajinta xaalada?

### Ka waran haddii aan cabasho ka qabo xanibid ama keli-yeelid ku dhacday cunugayga?

Waalidka ayaa cabasho qoraal ah u diri kara Kormeeraha Guud ee degmada si loo bilaabo baaritaan ay samayso degmada dugsigu. Waalidiinta ayaa sidoo kale haysta dookh ay walaacyada ugu sheegaan wakaaladaha kale ee dawlada, sida sharci fulinta, waaxda degmada ee waaxda Adeegyada Difaaca Ilmaha (Adeegyada Shaqada iyo Qoyska), ama Xafiiska Ashaxa Xirfada oo kamid ah Waaxda Waxbarashada ee Ohio (Waaxda). Waxaa intaas dheer, waalid ayaa gudbin kara [cabasho] uu u diraayo Xafiiska Carruurta qaba Baahiyaha Gaarka ah ee Waaxda. Haddii waalidku u baahdo taageero laga siiyo arintaan wuxuu la xariiri karaa [Isbahaysiga Ohio ee Waxbarashada Carruurta Naafada ah] ama [Disability Rights Ohio]. Degmadu waa inay xog ka bixisaa sida cabashada loogu diraayo kormeeraha guud, wakaaladaha kale ama Waaxda.

[Codsashada Tusmada Kulanka IEP]

### Xagee ayaan ka helayaa nuqulka Sharciga Gobalka ee looga hadlay ogaysiiskaan?

Sharciga waxaa laga heli karaa webseedka Waaxda Waxbarashada ee [Ohio]. Sharciga ayaa sidoo kale laga heli karaa webseedka Guddida Adeegga Sharciga (Legislative Service Commission). Degmadu waa inay awoodaa inay waalidiinta ku xirto haddii aysan awoodin inay adeegga helaan.

**#EachChildOurFuture**

## Ilaha xogta

[Xanibaada iyo Keli-yeelida: Dokumentiga Xogta, Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Maajo 2012.]

[Xaashida Xaqiiqada: Xanibaada iyo Keli-yeelidda Ardayda Naafada ah, Waaxda Maraykanka ee Waxbarashada, Diseembar 2016]

[Waraaqda Shaqaalaha Qaaliga ah: Xanibaada iyo Keli-yeelida Ardayda Naafada ah, Waaxda Maraykanka ee Waxbarashada, Diseembar 28, 2016]

[Caawimaadaha iyo Taageerooyinka Habdhaqanka Wanaagsan, Xarunta Caawimaada Farsamada ee OSEP]

www.ocali.org
www.ocecd.org
www.disabilityrightsohio.org
Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo Caawimaadaha iyo Taageerooyinka Habdhaqanka Wanaagsan iyo adeegsiga Xanibaad ama Keli-yeelida

[Sharciga Maamulka ee Ohio 3301-35-15]